



Muslimku xaga uu ku leeyahay Mlimka kale waa shan: salaanta oo la radyo, bukaanka oo la booqdo, Janaasada oo la raaco, u yeerida oo la ajiibo iyo markuu hindhisoo loo duceeyo

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqalay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Muslimku xaga uu ku leeyahay Mlimka kale waa shan: salaanta oo la radyo, bukaanka oo la booqdo, Janaasada oo la raaco, u yeerida oo la ajiibo iyo markuu hindhisoo loo duceeyo".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey wax ka mida xuquuqda Muslimku ku leeyahay Walaalkiisa Muslimka ah. Xaqa ugu horeeya waa salaanta oo laga radyo cidii ku salaanta. Xaqa labaad: waa booqashada Qofka jiran iyo siyaaradiisa. Xaqa seddexaad: waa Janaasada raacideeda laga bilaabo Gurigiisa ilaa meesha lagula tukanaayo ilaa Qabriga ilaa laga aaso. Xaqa afraad: waa in la ajiibo u yeerida haduu ugu yeero casuumad Guur iyo qayrkeedba. Xaqa shanaad: waa in loo duceeyo markuu hindhisoo oo uu yiraaho Alxamdu lilaah, oo lagu dhoho: yarxamuka Allaah, ka dib kan hindhisay uu yiraahdo: yahdiikumu Allaah wa yuslix baalakum.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3706>